

Iska ilaalinta Iska Saarida Guriga oo Dheeraad ah oo loogu talagalay Ijaartayaasha Lacagtooda La kabo: CARES Act

Waa maxay CARES Act?

Ijaartayaasha ku nool guryaha dakhligoodu hooseeyo, ama haysta foojar lagu bixiyo qaar ka mid ah ama dhammaan ijaarkooda, haysta ilaalin dheeraad ah oo ka dhan ah iska saarida guryaha ee la xiriirta bixin la'aanta lacagta ijaarka. Ijaartayaasha dakhligoodu hooseeyo ee hela caawimaad dowladeed ee bixinta ijaarkooda, mulkiyaasha guryuhu waa in ay qoraal ahaan ku siiyaan **ugu yaraan ogeysiin 30 maalmood ah** ka hor inta aan iska saarida guriga laga gudbin maxkamadda taasi oo ku saleysan bixin la'aanta lacagta ijaarka (waa suurtagal in shuruudahan ogeysiinta ee 30 maalmood ah ay sidoo kale dhici karto in ay khuseeyaan noocyada kale ee ogeysiinta iska joojinta ijaarka, laakiin sharcigu ma kala cada tani).

Sharci federaal, CARES Act, wuxuu khuseeyaa dhammaan ijaartayaasha dakhligoodu hooseeyo ee hela caawimaad dowladeed si ay u bixiyaan lacagta ijaarkooda. Tani waxay khuseysaa dadka ku nool:

- guryaha dadweynaha
- lacagta canshuurta lagu xisaabiyo ee guryaha ee dadka dakhligoodu hooseeyo (LIHTC)
- guryaha horumarinta reer miyiga
- guryaha halka foojarku bixiyo lacagta qayb ka mid ah ama dhammaan ijaarka

CARES Act waxay mulkiilayaasha guryaha uga baahan tahay in ay bixiyaan ugu yaraan ogeysiin 30 maalmood ah ka hor inta aan la gudbin kiiska iska saarida guriga oo ka dhan ah ijaartaha uu daboolayo xeerka CARES Act.

Sidee bay ijaartayaasha u ogaan karaan in uu daboolayo xeerka CARES Act?

Haddii ijaartayaashu aysan hubin in uu daboolayo CARES Act, waxaa jira siyaabo lagu ogaanayo.

- Eeg heshiiska ijaarida ama ijaarka. Guryaha dakhligoodu hooseeyo intooda badan waxay yeelan doonaan heshiiska ijaarida ama ijaarka oo wax ka sheegaya maalgelin kasta oo dowladeed oo khuseysa.
- Fiiri ogeysiinta iska joojinta ijaarka oo kasta oo mulkiilaha gurigu bixiyo. Haddii ay la timaado maclumaad ku saabsan Xeerka Rabshada Ka dhanka ah Haweenka (VAWA), ijaartaha waxay u badan tahay in uu daboolayo xeerka CARES Act, sidoo kale.
- Haddii ijaarte kaliya bixiyo qayb ka mid ah ijaarka, oo inteeda kalena uu bixiyo maamulka guryuhu, ijaartuhu wuxuu u badan yahay in uu daboolayo xeerka CARES Act.

Sidee bay ijaartayaashu u isticmaali karaan xeerka CARES Act si ay ula dagaalamaan iska saarida guriga?

Haddii mulkiilahaaga gurigi uu gudbiyo kiiska iska saarida guriga oo kaa dhan ah, waxaad la xiriiri kartaa Mashruuca Iska difaacida Iska saarida Guriga wixii la xiriira caawimaada dhanka sharciga ah. Mashruuca Iska difaacida Iska saarida Guriga ka wac 888-585-9638, Isniinta-Jimcaha laga bilaabo 9-1 galabnimo, e-mail-ka evictiondefense@oregonlawcenter.org, ama booqo <https://oregonlawcenter.org/eviction->

[defense-project/](#) Haddii aad u dhaafto farriin ama email, **waa in aad tiraahdaa in aad u maleynayso in uu ku daboolayo xeerka CARES Act.**

Ijaartayaasha awoodi waaya in ay caawimaad ka helaan Mashruuca Iska difaacida Iska saarida Guriga, waxaa suurtagal ah in ay iska difaacaan maxkamadda.

Haddii mulkiile guri uu ogeysiinta bixin la'aanta lacagta ijaarka siiyo ijaarte u daboolayo xeerka CARES Act taasi oo siinaysa wax ka yar 30 maalmood ka hor inta ay tahay ijaartuhu in uu guuro (sida ogeysiinta iska joojinta ijaarka oo 10 maalmood ah) waxaa dhici karta in ijaartuhu uu difaac ku yeesho maxkamadda dhexdeeda.

Si la iskaga difaaco iska saarida guriga oo la adeegsanayo xeerka CARES Act, ijaartayaashu waa in ay:

- aadaan ka soo muuqashada maxkamadda ee u horreysa
- gudbiyaan jawaab ama bixiyaan kharashka gudbinta ama codsadaan in laga dhaafto kharashka
- calaamadeeyaan sanduuqa ee ku qoran foomka jawaabta oo sheegaya in ogeysiinta iska saaridu guriga uu qalad tahay
- sharraxaan in ijaartaha uu daboolayo xeerka CARES Act.
- tagaan maxkamadda oo qareenka tusaan caddeyn ah in ijaartaha uu daboolayo xeerka CARES Act
- caddeyn waxaa ku jiri kara heshiiska ijaarka oo sheegaya in hantidu guryuhu ay tahay mid lacagteeda la kabo, ama warqada ka socota maamulka guryaha oo wadata macluumaad ku saabsan foojarka.

Ijaartayaashu waxaa dhici karta in ay dhibaato ku qabaan in sida uu shaqeeyo xeerka CARES Act u sharraxaan xaakim iyada oo uusan jirin qareen. Haddii ay suurtagal tahay, **ijaartayaashu waa in ay la xiriiraan qareen maxkamadda ka hor.**

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka iska saarida guriga ayaa laga helayaa www.OregonLawHelp.org, iyo www.OregonRentersRights.org

Maxaa dhacaya ee xiga?

Haddii ijaarte caddeeyo in uu daboolayo xeerka CARES Act, maxkamaddu waa in ay meesha ka saartaa iska saarida guriga. Laakiin mulkiilaha gurigu waxay u badan tahay in uu ijaartaha siiyo ogeysiin cusub oo siinaysa 30 maalmood oo uu ku guuro. In lagu guuleysto kiiska maxkamadda ee iska saarida guriga si joogto ah uma xalinayo dhibaata, laakiin waxay ijaartayaasha u heli kartaa waqti dheeraad ah oo ay ku bixiyaan ijaarka, ama ku guuraan.

Waa maxay waxyaabaha kale ee ijaartayaashu sameyn karaan haddii aysan awoodin ijaarkooda?

Ijaartayaasha ku nool guryaha dakhligoodu hooseeyo waxaa dhici karta in ay awoodaan in ijaarkooda hoos loo dhigo haddii dakhliga gurigu isbeddelay. Ijaartayaasha ku nool guryaha dadweynaha, ama foojar ka hela maamulka guryaha, waa in ay la hadlaan shaqaalahooda kiiska ee guryaha haddii uu jiray isbeddel ku yimiday dakhliga.

Taageerada dhanka ijaarka ayay dhici kartaa in laga heli karo bulshadaada. Waxaad wici kartaa 2-1-1,

ama booqo www.211info.org wixii macluumaad ah ee ku saabsan taageerada dhanka ijaarka.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qoddobka xeerkani CARES Act: [Enforcing-CARES-Act-30-Notice.pdf \(nhlp.org\)](#) Haddii mulkiilahaaga gurigi uu gudbiyo kiiska iska saarida guriga oo kaa dhan ah,

waxaad la xiriiri kartaa Mashruuca Iska difaacida Iska saarida Guriga **wixii la xiriira caawimaada dhanka sharciga ah.** Mashruuca Iska difaacida Iska saarida Guriga ka wac 888-585-9638, e-mail-ka evictiondefense@oregonlawcenter.org , ama booqo <https://oregonlawcenter.org/eviction-defense-project/>

Wixii la xariira su'aalaha guud, waxaad macluumaadka lagala xiriirayo ka heli kartaa xafiiska gargaarka sharciga oo kuu dhow oo ku yaala <https://oregonlawhelp.org/find-legal-help>.

Waxaad sidoo kale Adeega Gudbinta Qareenada Gobolka Oregon kala xiriiri kartaa (503) 684-3763.